



**JUMHUURIYADDA FEDERAALKA
SOOMAALIYA**

**BAARLAMAANKA FEDERAALKA
SOOMAALIYA**


QARAAR KU SAABSAN

**DOORASHADA MADAXWEYNAHA JFS
M.NE MAXAMED CABDULLAHI
MAXAMED "FARMAAJO"**

Muqdisho, 8^{da} Febraayo 2017

BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIA

- Markuu arkay:** Qodobka 89-aad ee Dastuurka Federaalka;
- Markuu arkay:** Qodobka 19-aad ee Xeer Hoosaadka Golaha Shacabka iyo Qodobka 4-aad ee Xeer Hoosaadka kmg ee Doorashada Madaxweynaha Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
- Markuu Dhageystay:** Hadaljeedinta Musharaxiinta ay aragtidooda iyo barnaamijkooda ku soo bandhigeen kana jeediyeen Labada Gole ee BFS hortiiisa,
- Markuu Arkay:** Natiijada lagu soo gunaanaday Geeddisocodka doorashadii Madaxweynaha 9-aad ee Jumhuuriyadda Soomaaliya oo la qabtay 8^{dii} Febraayo 2017.
- Markuu Arkay:** Warbixinta Guddiga Baarlamaanka FS uga xilsaaran Doorashada Madaxweynaha JFS.
- Markuu Arkay:** Warbixinta ku taariikheysan 12/2/2017 ee Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka oo goobjooge ka ahaa Doorashada Madaxweynaha JFS oo caddeeyey in nidaamka lagu maamulay doorashadan yahay mid waafaqsan sida uu farmay Dastuurka Federaalka.
- Markuu Arkay:** Warbixinta Guddiga Ilaalinta Bedqabka Geeddisocodka iyo Anshax Wanaagga oo hubiyey in habraaca lagu hirgeliyey Geeddisocodka Doorashada Madaxweynuhu yahay mid ka bedqaba wax shaki ah, kuna fulay daahfurnaan ka maran welwelladii ay muujiyeen iyo wararkii doorashada ka hor ka soo yeeray meelo qaarkood caalami ah iyo kuwo dalka gudahiisaba laga waayey.
- Asaga oo ku kalsoon:** In 8^{dii} Febraayo 2017 Xildhibaanada Baarlamaanka Federaalku ayagoo isku kalsoon ay si xor ah oo cabsi ka maran u codeeyeen kana tarjumeen rabitaanka Shacabka Soomaaliyeed.



Qaraar
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya
Qodobka 1-aad:

Baarlamaanka Federaalka wuxuu caddeynayaa si farxad iyo rarrayn lehna u soo dhoweynayaa M.ne Maxamed Cabdullahi Maxamed “Farmaajo” oo 8^{dii} Febraayo 2017 loo doortay in uu noqdo Madaxweynihii 9-aad ee Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya oo isla taariikhdanna xilka loogu dhaariyey Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya hortiisa si waafaqsan Qodobka 89-aad ee Dastuurka Federaalka Soomaaliya.

Qodobka 2-aad:

Haddii aan si kale oo dastuuri ah wax looga beddelin muddada xilhaynta M.ne Maxamed Cabdullahi Maxamed “Farmaajo” waa ka bilaabata 8^{da} Febraayo 2017 kuna eg 7^{da} Febraayo 2021 si waafaqsan Qodobka 91-aad ee Dastuurka Federaalka Soomaaliya.

Qodobka 3-aad:

Qaraarkan iyo Natijada Doorashada Madaxweynaha ee halkan ku lifaaqan wuxuu dhaqangelayaa 8^{da} Febraayo 2017, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jumhuuriyadda.

M.ne Muxammad Sh. Cusmaan “Jawahir”
Guddoomiyaha Golaha Shacabka Soomaaliya

